


# Fayruska-Corona

## Halkan ka aqriso:

- Nidaamka dowlada • Xanuunada corona leedahay
- Baarista • Tallaalka

### Talloyinka gudaha iyo banaanka

- Waa inaad mar walba ka fogaaataa 1,5 mitir dadka kale.
- Ilmaha ilaa 13 jir wey isu dhawaan karaan iyo dadka weyn wey u dhawaan karaan.
- Gacmaha saabuun ku dhaq marka aad guriga imaado ama aad qof soo booqato.
- Ka shaqey guriga, ilaa haddii aysan si kale suuroobin.



### Maskarka afka laga bilaabo 13 jir



Maskarka afka waa waajib in la xirtaa meelaha soo socda:

- Iskuulka. Maskarka waa iska bixin kartaa marka aad casharka ku jирто.
- Gaadiidka dadweynaha gudihiisa, istashoonka iyo diyaarada dhex-deeda.



Meelaha kale oo dhan maskarka afka qasab ma aha.

Haddana waa in meel walba 1,5 mitir inaad dadka ka fogaaataa.



### Markaad jiran tahay: waxaad sameysaa baaritaan iyo joog guriga

Waxaad sameysaa baaritaan-Corona iyo joog guriga haddii 1 ama ka badan calaamadahan qabto:

- **ka badan 37,5 darajo**
- **neefsashada ku dhibeysyo.**
- **mar keliya carfiska iyo dhadhamiska kaa tago.**
- **qufaca**
- **hindhisca**
- **diif sanka ah**
- **dhuun xanuu**


Markuu jiro **xumad** ama **neefsashada ku dhibeysyo** waa in qof walba oo gurigaaga deggan, guriga **joogaan**. Haddii aadan xanuun lahayn ha **sameynin** baaritaanka. Xumad waa marka ay xaraarada ka badan tahay 38 darajo.

## Baaritaanka

Baaritaanka- Corona waa lacag la'aan

Waxaad ballan u sameysan kartaa 2 qaab:

1. Combiyutarka: Aad [www.coronatest.nl](http://www.coronatest.nl). waxaad u baahan tahay DigiD-gaaga.
2. Telefoonka: Wac **0800-1202**.



Guriga joog ilaa aad natijjada ka hesho GGD.

Laguuma oggola in lagu soo booqdo ilaa aad natijjada hesho. GGD ayaa kuu sheegeysa markaaad banaanka aadi karto.

## Tallaalka

Tallaalka ka hortaga Corona wuxuu kaa badbaadinaayaa fayrus-ka-Corona.

Waxaa tallaalka u qaadaneysaa cirbad ahaan oo garabka ah.

Tallaalka ka dib kuma xanuunsaneysid fayruska ama wax yar ayaa ku xanuunsanaysaa.



Nederland qof walba laga bilaabo 18 jir ballan tallaalka ah waa sameysan karaa.

Waxaa websaytka Pharos ku qoran warbixin dheeraad oo tallaalka ku saabsan.

## Dhaqtarka qoyska

Waa muhiim markaad xanuno Corona leedahay aadan **aadin** dhaqtarka qoyska. Waa inaad horta wacdaa .

Ma leedahay xanuno kale oo aan Corona ahayn? Markaasina soo wac oo la soo hadal. Waa muhiim inaad daryeel heshaa maka aad u baahan tahay.



Waxaad websaytka [www.Thuisarts.nl](http://www.Thuisarts.nl) ka heleysaa warbixin dheeraad oo Corona ku saabsan.

## Ma qabtaa su'aalo kale oo ku saabsan Corona fayruska:

La xariir **0800-1351**